



Wax-ka-qabashada Xad-gudubyada Dhaqaaleed

Waa maxay Xadgudubyada Dhaqaaleed?

Wax ku yeelida dhaqaaluhu waxay dhacdaa marka lacagta loo isticmaalo in lagu hello awooda iyo xakamaynta qof kale. Dhibta dhaqaaluhu waxay qofka gelin kartaa xiriir dhibaato leh, waxayna saamayn kartaa awoodooda inay ku sugnaadaan amaan haddii ay go'aansadaan inay tagaan.

Ma wax badanoo dhacaa?

Australia gudaheeda, ilaa 16% dumarku waxay la kulmaan dhibaataayn dhaqaale inta ay nool yihiin, waxaana laga yaabaa raggana inay saamayso.

Xadgudubyada Dhaqaaleed waxay u saamayn kartaa dadka heerar dhaqaale oo kala duwan oo ka yimid iyo asal qawmiyadeed dhamaan sinjiyadaha. Dumarka iinta leh ama qabay xaallado muddo dheera ayaa badanaa u badan marka loo fiiriyo dadweynaha guud inay la kulmaan Xadgudubyada Dhaqaaleed.

Aqoonsiga Xadgudubyada Dhaqaaleed

In kasta oo ay jirtu Xadgudubyada Dhaqaaleed way adag tahay in la aqoonsado:



Kuwa badan ayay ku adkaataa inay arkaan inay ku jiraan xiriir dhaqaale oo dhibaataayn ah.



Dhaqaale ku xumaynta ama wax ku yeelidu waxaa laga yaabaa inay ku bilaabato si sahlan siina siyaado.



Dhaqamada qaarkood, waxaa laga yaabaa in loo arko wax la aqbali karo in qof kantaroolo dhaqaalaha guriga oo dhan.



Marmarka qaarkood, lacagta waxaa loo arkaa arrin gaar ah si furana loogama wada hadlo.

¹ Kutin, Russell, Reid (2017), Economic Abuse between intimate partners in Australia: Prevalence, health Status, disability iyo financial stress, Australian and New Zealand Journal of Public Health

Waa wax caadi ah in dad dareemo ceeb iyo wax aan laga hadli karin marka laga hadlayo ku xumaynta dhaqaalaha.

Waa muhiim in aad barato calaamadaha ku xumaynta dhaqaalaha, halka laga helayo caawimo, iyo sida loo kaalmeeyo xubnaha qoyska ama saaxiibka khatarta ku jira. Tani waxay caawimi kartaa dhibanaha si uu uga bogsado una yeesho madaxbanaanida dhaqaalaha.

Calaamadaha Xadgudubyada Dhaqaaleed:

Ma hubo inaad qabto dhibaato dhaqaale iyo in aadan qabin?
Weydii naftaada su'aallaha soo socda:



Somali



Ninkaagu marna ma kuu diiday inaad hesho shaqo ama inaad aado shaqo?



Marna ma kugu cadaadiyeen dadkaagu inaad joojiso lacag helida ama inaad kharajgarayso lacagtaada?



Qofkaad wada nooshihiin ma diiday bixinta kaalmada ilmaha ama daryeelka ilmaha?



Ninkaad wadam nooshihiin ma kantaroollaa sida lacagta guriga soo gasha loo kharajgareeyo?



Ninkaagu ma eegaa wixii aad kharajgaraysay ama ma ku weydiiyaa inaad tusto rasiidyada waxaad soo gaday?




Marna ma laguu diiday inaad hesho lacag ama kharajyada asaasiga u ah naftaada ama carruurtaada?



Marna ma laguu diiday in aad guriga dadka degan lacag ku bixiso?



Marna ma lagu weydiiyey inaad hawl qabato ama 'hawl qabato' si lacag laguu siiyo?



Ma lagugu khasbay inaad deyn soo qaado ama ka soo bixiso Kaarka deynta ee magacaaga ku qoran?



Ninkaagu ma kaa qariyaa lacagtiisa ama ma ka dhigaa qarsoodi dhaqaalaha qoyska?



Aragtidaada ma la diidaa wixii khuseeya go'aanada waaweyn ee dhaqaalaha?



Ma lagugu cadaadiyaa inaad kaga shaqayso lacag la'aan ganacsiga qoyska?

Sida caawimaada lagu hello

- Haddii adiga ama qof aad taqaan ay haysato xadgudub dhaqaale, ama aadan hubin, waxaa jira adeegyo lacag la'aana oo aad heli karto.
- Iyada oo ah meesha ugu horraysa oo aad la xiriirayso waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad ka wacdo **1800RESPECT 1800 737 732**. Kani waa adeeg lacag la'aan oo qarsoodi ah.
- Haddii aad u baahan tahay turjubaan, waxaad isticmaali kartaa telefoonka Adeega Tarjumaada iyo Fasiraada (TIS National) tel: **131 450**, si cadna ugu sheeg luqadaad u baahan tahay weydiina inay la xiriiraan 1800RESPECT oo laga wacayo 1800 737 732. TIS National ayaa lagu hellaa lacag la'aan.
- Haddii kale, waxaad wici kartaa **1800RESPECT** oo laga wacayo **1800 737 732** weydiisana mutarjum. Talabixiyaha ayaa qaban qaabada samaynaya.

Macluumaad intaas ka badan oo faahfaahsan akhri "Addressing Financial Abuse Guide" oo laga hello websaytka [CommBank website](#).